

# Alien Emergency Medical (AEM)

## Qiimeynta iyo daaweynta COVID-19

### Taariikhda

Alien Emergency Medical (AEM) waa barnaamij loogu talo galay shakhsiyaadka ku haboon daawada xaalada degdega ah ee aan buuxinin shuruudaha muwaadinimo ama socdaalka, ama shakhsi ku haboon oo aan buuxin baarka 5-sano.

Ku haboonaanshaha xaaladaha degdega ah waxa ka mida:

- Booqashooyinka xaaladaha degdega ah
- Joogitaanka bukaan ee cisbitaalka
- Qaliinka bukaan socodka
- Sifeynta kaadida
- Daaweynta kansarka
- Daawooyinka muditaanka

### Warbixinta barnaamijka

Iyadoo laga jawaabay [xanuunka COVID-19](#) Masuuliyiinta Daryeelka Caafimaad (HCA) waxay diyaariyeen [sharciga xaalada degdega ah](#). Sharcigani wuxuu sharxayaa:

- Ku haboonaanshaha waxa lagu darayaa qiimeynta iyo daaweynta COVID-19.
- Baadhitaanka iyo daaweynta waxa kujira xafiiska, shaybaadhka, ama adeegyada caafimaadka tilifoonka.
- Adeegyada la ansixiyey. Shakhsiyaadka laga helo COVID-19 waxay heli karaan daawooyin iyo adeegyada neesashada oo laga daboolay. Natijoooyinka qofka leh COVID-19 wuxuu heli karaa booqashooyin ku xiga iyo daawooyin laga kafaalo qaaday.

### Sida loo codsado.

Da'da 19 ilaa 64:

- **Onlaayn:** booqo [Washington Healthplanfinder](#)
- **App-ka moobilka:** Kala deg [WAPlanfinder app](#)
- **Warqad:** [Codsiga Daryeelka Caafimaad \(18-001P\)](#)
- **Tilifoon:** 1-855-923-4633

Da'da dadka waaweyn 65 ama ka weyn, araga naafo ka ah, naafo ah, ama u baahan adeegyada mudada dheer:

- **Onlaayn:** [Washington Connection](#)
- **Warqad:** [Codsiga dadka da'da ah, araga naafada ka ah, naafada ah/daryeelka mudada dheer u baahan \(18-005\)](#)
- **Tilifoonka:** 1-877-501-2233

Warqada [AEM fax](#) waxa ku jira COVID-19 oo hoos yimaada Codsashada qeybta Kafaalo qaadka.